

Yaa lagu tijaabiyay tallaalkada COVID-19?

Abriil 14, 2021

Ka hor intii aan la ansixinin tallaalka si loo isticmaalo, waxaa lagu tijaabiyay tiro badan oo dad ah si loo xaqiijiyo inuu yahay mid shaqaynaya oo ammaan ah. Kuwaan waxaa loo yaqaan "tijaabooyinka caafimaadka" ("clinical trials"). Saynisyahanadii tijaabiyay tallaalkada COVID-19 waxa ay ku sameeyeen diraa-sooyinkooda dad badan oo kala duwan, oo isugu jira dad isir ahaan iyo qolo ahaanba kala duwan.

Maxay tahay sababta tallaalka loogu tijaabiyay dad asalkoodu kasoo jeedo meelo kala kuwan?


Waxaa muhiim ah in diraa-sooyinka tallaalka ay ka qayb qaataan mutadawiciin kasoo jeeda dadyawga qaadanaya tallaalka. Saynisyahanadii tijaabiyay tallaalkada COVID-19 waxa ay ogaayeen in dadka aan caddaanka ahayn ay khattar dheeraad ah ugu jiraan inay kua xanuunsadaan una dhintaan COVID-19 tasoo ay sabab utahay arrimo ay ka mid yihiin caqabado dhanka helitaanka daryeelka caafimaad ah, dakhliga, waxbarashada, shaqooyinka, iyo lahaanshiyaha guriyayn amni ah. Sidaa awgeed, waxa ay sameeyeen dadaalo kutalo gal ah si ay uga qayb galiyaan dadka san cadaanka ahayn diraa-sooyinkooda. Tani waxa ay siin doontaa qofkasta fursad iskaga ilaaliyo COVID-19.

Intee inleeg ayaa ay kala duwanaayeen dadyawga ka qayb qaatay diraa-sooyinka tallaalka?

Saynisyahanadu waxa ay ku tijaabiyeen tallaalkada COVID-19 (kuwanoo hadda laga ansixiyay Canada) kumanaan qof oo kasoo kala jeeda asal ahaan qolooyin iyo isiro badan. Jadwalkan hoose waxa uu muujinayaa sida ay dadku ukala duwanaayeen.

Qolooyinka iyo isirada ay nafhooda u aqoonsadeen inay kasoo jeedaan*	Tallaalka Moderna	Tallaalka Pfizer-BioNTech	Tallaalka Johnson iyo Johnson	Tallaalka AstraZeneca
Caddaan	79%	83%	62%	79%
Madow ama Afrikaanka Ameerikaank ah	10%	9%	17%	8%
Aasiyaan	5%	4%	4%	4%
Asal ("Hindi Ameerikaan" ama "Asal ahaan kasoo jeeda Alaska")	0.8%	0.5%	8%	4%
Asal ahaan kasoo jeeda Hawaiian ama Deggen Jaziiradaha Pacific-ga	0.2%	0.2%	0.3%	--
Qolooyin kala duwan kasoo jeeda	2%	2%	45%	--
Hispanic/Latino	21%	28%	45%	22%
Kuwo kale	2%	--	5%	--
Aan ka werbixin/aan la garanayn	0.9%	0.6%	3%	--

*Kuwan waxay ahaayeen ereybixinadii loo isticmaalay diraa-sooyinka cilmiyeed. Ka qayb qaatayaasha qaar waxa ay sheegteen inay asal ahaan kasoo jeedaan in kakabadan hal qolo ama isir.



Dairasada tallaalka Moderna waxa lagu sameeyay Maraykanka daraasada tallaalka Pfizer-BioNTech waxa lagu sameeyay Maraykanka, Argentina, Brazil, Germany, South Africa, iyo Turkey.

Daraasada Johnson and Johnson waxa lagu sameeyay Maraykanka, Brazil, South Africa iyo shan dal oo kale oo Latin Ameerika ah (Argentina, Chile, Colombia, Peru iyo Mexico).

Falanqaynta tallaalka AstraZeneca waxaa ku jiray daraasaadyo ka dhacay 88 xarumood oo ku yaal Mareykanka, Peru iyo Chile.

Tallaalku miyaa uu ku shaqeyay qaab isku mid ah kooxo kala isir iyo qolo duwan?

Haa. Tijaabooyinku waxa ay muujiyeen in tallaalkadu ay lahaayeen waxtar iyagoo ka hortagaayay ku xanuusiga COVID-19. Si isku mid ah ayaa ay waxtar ugu lahaayeen dadyawga kala duwan ee kasoo jeeda qolooyinka iyo isirada kala duwan.

Illaa maanta 14ka Abriil, dadka dunida ku nool oo dhammi, oo ay ka mid yihiin China, Mexico, Bangladesh iyo South Africa, waxa qaateen **825 milyan tallaalka** oo ah tallaalkada kala duwan ee COVID-19.



Waxa aanu rajaynaynaa inaad nuxurkan wax ka faa'iday! Waxa aanu kugu soo dhawaynaynaa inaad uwadaagto si ballaadhan, u isticmaasho inaad ka samayso fayl cod ah ama fiidiyawba, ama uturjuntu luuqado badan si aad dad badan ula wadaagi karto. Fadlan xaqiiji oo hubi inaad sheegto isha aad ka heshay xogta: Women's College Hospital, OCASI, TAIBU Community Health Centre and Refugee 613.

Macluumaadkani waa mid sax ah illaa 14ka Abriil, 2021

Xogta halkan ku xusan waxa ansixiyay dhakhtaro kanadiyaan ah: Meb Rashid MD, Kaaliye Bare sare, University of Toronto, Vanessa Redditt, MD, Bare, University of Toronto iyo Isaac I. Bogoch, MD, Associate Professor, University of Toronto

